

[www.stop-fgm.admin.ch](http://www.stop-fgm.admin.ch)




Schweizerische Eidgenossenschaft  
Confédération suisse  
Confederazione Svizzera  
Confederaziun svizra

The Federal Council



## Warqada illaalada ka dhanka ah gudniinka dumarka ee Xiriirka Swiss



### Xubnaha Qoyska, Gabdhaha iyo Ragga Qaaliga ah,

Dowlada Swiss waxay halkaan xaqijineysaa in gudniinka xubinta taranka dumarka lagu ciqaabi karo sida waafaqsan sharciga dambiga ee Swiss. Labada-ba gudayaasha iyo waaladiinta iyo qaraabada geystay ama ku garab istaagay fal noocaas ah waa inuu ka fishaa cawaqaqibo (ay la kulmaan cawaqaqib sharciyeed oo halis ah) sharci dhab ah gudaha Switzerland. Tan ayaa quseyso xittaa haddii gudniinka xubinta taranka lagu sameeyay dibada oo dambiiлаha uu ku suganyahay gudaha Switzerland.

Ixtiraam xaaladaan oo uga fogow gudniinka xubinta taranka dumarka llaalinta gabadhaada iyo qoyska oo dhan dartood. Dokumentigaan waxaad ka heleysaa warbixin badan oo mowduuca ku saabsan.

**Elisabeth Baume-Schneider**  
Xildhibaanka Federaalka, Madaxa Waaxda Arrimaha Gudaha ee Federaalka (ED)

**Beat Jans**  
Xildhibaanka Federaalka, Madaxa Waaxda Caddaaladda iyo Booliska ee Federaalka (EFPD)

## Gudniinka dumarka waa mamnuuc

Gudniinka dumarka waa ka mamnuuc gudaha Switzerland sidoo kale sida wadamada kale badankood.

Xeerka Guddiga Art. 124 (StGB): Goynta xubinta taranka dumarka

<sup>1</sup> Qof walboo gooya xubnaha taranka ee qof dumar ah, oo si weyn ama joogta ah loo curyaamiyo shaqadooda dabiiciga ah ama ku waxyeoleyso qaab kale ayaa muteysanayo xukun xabsi ah lix billood ah illaa tobant sanno.

<sup>2</sup> Qofka ayaa sidoo kale muteysanayo dacwad oogid haddii uu dembiga ku galo dibada, oo uu joggoo Switzerland oo aan la dhiibin. [...]

Gudniinka gabdhaha waxaa lagu ciqaabi karaa Switzerland...

**...xittaa haddii lagu sameeyo dibada.**

...xittaa haddii lagu sameeyo „rug caafimaad“ iyo/ama uu sameeyo xrfadle caafimaad.

...xittaa haddii lagu sameeyo ama la diyaariyo ka hor gelitaanka (koowaad) ee Switzerland. Marka sidoo kale haddii gabadha lagu gudo aragtida ka tagida wadankeeda asalka ah.

### Waa maxay gudniinka dumarka?

Gudniinka dumarka waa ka goynta qeyb ahaan ama dhammaan xubinta taranka dibada ah. Gudniinka dumarka ayaa sidoo kale ku jiro habraacyo mararka qaar loo tixgeliyo waxyar sida daloolinta/ka jarida xubinta taranka dumarka.

## Gudniinka gabdhaha waa la ciqaabaa


- Ma ahan kaliya gudayaasha in la ciqaabo, laakin sidoo kale waaladiinta ama qaraabada haysto garbar la guday.
- Hooyada iyo aabaha (ama masuulada kale, haddii ay quseyo) ayaa masuul ka ah illaalinta gabadha. Haddii aysan ka illaalintagabatha gudniinka, waxaa sidoo kale lagu ciqaabi karaa.
- Qofka aan daganeyn gudaha Switzerland ayaa sidoo kale la xukumi karaa oo la ciqaabi karaa haddii isaga ama iyada ay ku suganyihin gudaha Switzerland oo aanan lagu dhiibin (tusaale ahaan booqashada ama dal marida).

### Waa maxay ciqaabta?

- Ciqaabta waa xukun xabsi oo lix billood illaa tobant sanno ah (sadarka Art 124. 1 SCC).
- Intaas waxaa dheer, dambiliilaha ajaanibka waa laga ceyrinayaa Switzerland muddo 5 ilaa 15 sanno ah haddii la xukumo (sadarka Art. 66. 1 let. b StGB).

## Maxaa gudniinka dumarka loo mamnuucay

Waa qaab xad gudub ka dhan ah dumarka iyo carruurta. Gudniinka gabdhaha waxay ku yeelan karaan cawaaqilbo raago, halis ku ah jirka, cilminafsiga iyo bulshada ee kuwa ay saameysay. Kuwa badan ayaa la dhibaatooda markaas kadiib, tusaale ahaan, xanuuno, caabuqyo, dhalmo la'aan iyo dhibaatooyinka inta lagu jiro dhalmada. Intaas waxaa dheer, dhimasho ayaa dhici karto inta lagu sameynta gudniinka gabdhaha sabab la dhiigbax ama caabuqa.



**Muhiim ah in la ogaado:** Gudniinka fircooni-ga ah ee habluhu waa dembi iyo xad gudub weyn oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha iyo carruurta. Waa nooc ka mid ah tacadiyada ka dhanka ah haweenka iyo carruurta.

## Warbixin dheeraad ah

Xafiiska Faderaalka  
ee Caafimaadka Dadweynaha  
[www.stop-fgm.admin.ch](http://www.stop-fgm.admin.ch)


### Tallada

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad tallo u baahantahay, Swiss Confederation waxay kuu gudbinayaan Barta Xiriirkha Qaranka ee Shabakada ka dhanka ah Gudniinka Dumarka ee Switzerland.

Shabakada ka dhanka ah gudniinka dumarka Switzerland  
[www.gudniinka.ch](http://www.gudniinka.ch)  
I-meelka: [advice@gudniinka.ch](mailto:advice@gudniinka.ch)  
Taleefonka: +41 41 419 23 55

Calaameynta  
Daabacaha: Xiriirkha Swiss  
Taariiqda: 01.12.2023

BBL no. 316.203.som





Schweizerische Eidgenossenschaft  
Confédération suisse  
Confederazione Svizzera  
Confederaziun svizra

The Federal Council

Warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Swiss-ka rasmiga ah

## Warqada Illaalada ee ka dhanka ah Gudniinka Dumarka

Ka illaali gabadhaada gudniinka

Warbixin muhiim ah ee loogu tallogalay waaladiinta iyo masuulada kale ee ka cabsado in gabadhooda lagu gubo dibada.

Iyadoo la kaashanayo



Network against  
female genital cutting  
Switzerland

### Safarka ka hor:

- La hadal kuwa kaa ag dhow iyo xirfadlayaasha: La xiriir Shabakadda ka dhanka ah Gudniinka Dumarka ee Switzerland si aad ugala hadashid sida ugu wanaagsan ee aad uga illaalin kartid gabadhaada gudniinka. La hadal dhaqtar aad aaminsantahay (tusaale ahaan, dhaqtarka carruurta, dhaqtarka dumarka ama dhaqtarka qoyska).
- Ka har ama dib u dhig boqashooyinka qoyska: Haddii aad qaraabo leedahay oo doonaya in gabadhaada la gudo, waa inaad ka hartaa boqashadooda mar walboo suurtogal ah ama ha wadan gabadhaada.
- Ogeysii gabadhaada: La hadal gabadhaada (waxay ku xirantahay da'deeda) wax ku saabsan caafimaadkeeda iyo qatarta gudniinka dumarka, sababta aad u rabtid inaad ka illaalsid iyo sida ah inay u dhaqanto.

### Islamarkaasba:

- Waa inaad marwalba qaadataa warqada illaalada markii aad dibada u safreysid. La hayso waraaqa-haaga safarka.
- La joog gabadhaada ama ha uga tagin kaligeed daryeelka qaraabada muddo dheer.
- Ka qeybgeli seygaaga/xaaskaaga, lamaanaha iyo dadka kale ee adiga kuu dhow oo kugu taageeri karo illaalinta gabadhaada.
- Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Shabakada ka dhanka ah Gudniinka Xubinta taranka Dumarka ee Switzerland haddii aad horaan dibada u jirtid.

### Muhiim ah.

**Gabar la guday ama la gudayo qalad kuma lahan oo iyada dacwad laguma soo oogi karo. Gabdhaha iyo naagaha ay saameyneysyo iyo dumarka waxay xaq u leeyihiin illaalo iyo taageero.**

### Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahanta-hay caawin?

Barta Xiriirkha Qaranka ee Shabakada ka dhanka ah Gudniinka Dumarka ee Switzerland

Taleefonka: +41 41 419 23 55

I-meelka: advice@gudniinka.ch

www.gudniinka.ch

Farii sidhaa Facebook:

www.facebook.com/femalegenitalcutting

Kulamada la tashiga waa bilaash oo waxaa lagu sameyn karaa si qarsoodi ah oo ay fasiraad wehli-so haddii loo baahdo.

**Haddii ay jiraan xaalad degdeg ah: La soo xiriir booliska Taleefonka. 117 (Switzerland) ama 112 (Yurub).**